WAA MAXAY ISKAASHATADA GURYUHU?

Iskaashatada guryuhu waa hab guri ijaarasho ee ka duwan kuwa kale. Sababaha Dadku ugu soo biiraan ama xubin uga noqdaan Iskaashatada waa ayagoo doonaya inay helaan guryo:

- Fiican
- La awoodi karo ama jaban
- Nabadgelyo leh

Yaa maamula Iskaashatada?

Dadka ku nooli waxay xubno ka yihiin Iskaashatada. Xubnahaasi waxay mas'uul ka yihiin maamulka iyo socodsiinta hawlaha Iskaashatada, iyagaana gacanta ku haya.

Ma jiro ijaare iska leh Iskaashatada, xubnaha ayaana iska dhex-doorta guddi maamul. Guddigu wuxuu kor ka maamulaa hawlaha Iskaashatada. Iskaashatooyin badan ayaa leh shaqaale socodsiiya hwal-maalmeedka caadiga ah, laakin go'aannada waaweyn waxaa gaara xubnaha.

Xubinkasta waxay leedahay hal cod-bixin si loo go'aamiyo arrimaha ay ka mid yihiin:

- Ijaarka ay Iskaashatadu saareyso guryaha(arrintaas Iskaashatooyinku waxay ugu yeeraan guri saarid.)
- Doorashada xubnaha guddiga maamulka
- dejinta sharciyada iyo xeerarka Iskaashatada.

Ijaarka guryuhu(guryo saariddu) waxay badataa oo keliya marka kharajkyada Iskaashatadu kordhaan.

Yaa iska leh iskaashatada?

Guryaha waxaa iska leh Iskaashatada, waxayna ka ijaartaa xubnaha. Qofna ma soo iibsan karo mana sii gadi karo guryaha. Sida badan, Iskaashatooyinku waxay guryaha qaarkood ugu talagalaan dadka baahida gaar ka leh.

Yaa ku nool iIskaashatooyinka?

Iskaashatooyinka waxaa ku nool dad kala duwan. Qofkasta ee doonaya guri fiican, uu awoodi karo, nabadgelyona leh ayaa soo codsan kara. Xubnuhu si wadajir ah bay ugu shaqeeyaan Iskaashatada, taasna waxay siisaa dareen ka tirsanaansho. Arrintaasi waxay kaloo xubnaha u suurto-gelisaa inay ku faanaan Beeshooda Iskaashatada.

Sidee baan u codsan karaa ku noolaansho Iskaashato?

Nidaamka Iskaashato kasta waa ka yara duwan yahay kuwa kale. Halkaanse waxaan ku xuseynaa tillaabooyinka ay ka siman yihiin lana xiriirta xagga soo gudbinta codsiga:

Kulan Warbixineed: Tillaabada ugu horeysa ee Iskaashatooyinka qaarkood ay qaadaan waa qaban-qaabin shir war kororsi, xubnuhuna waxay ka soo jeediyaan warar la xiriira Iskaashatadooda. Arrintaasi waxay kugu caawineysaa sidii aad go'aan uga gaari lahayd ku noolaanshaha Iskaashatada. Iskaashatooyinka qaarkood ma qabtaan shirkaan oo kale, laakin waxay codsadayaasha Xafiiskooda yimaada siiyaanWarbixintaan Kooban.

Warqadda Codsiga: Tillaabada labaad waa dhanka codsashada oo si tifaftiran loo soo buuxinayo Warqadda Codsiga.Waxaa lagaa doonayaa inaad sheegtid dhammaan wararka lagugu soo weydiiyey Warqadda Codsiga.

Wareysi: Tillaabada saddexaad waa wareysi lala yeelanayo codsadaha.. Taaasi waxay ku siineysaa fursad dheeraad ah ee aad wax uga sii ogaatid Iskaashaytada, markaasna waxaa soo jeedin kartaa su'aalaha aad qabtid..

Maxaa dhacaya codsigeyga kadib?

Kadib markaad u soo gudbisid Warqaddaada Codsiga oo si fiican u buuxda, Iskaashatadu waxay:

- baaritaan ku sameynaysaa in deyn bixintaadu wanaagsan tahay iyo in xiriirkaaga xagga dadkii aad guryaha ka deganaan jirtay uu fiican yahay
- wareysi la yeelaneysaa dhammaan codsadayaasha waaweyn
- ka codsaneysaa Guddiga Maamulka inay oggolaadaan xubinnimada codsadayaasha
- u soo gudbineysaa codsadayaasha go'aanka guddiga
- kugu dareysaa taxanaha sugayaasha
- ku soo wargelineysaa markii guri bannaanaado.

Maxaa dhacaya markii guri bannaanaado?

Haddii Guddigu xubinimadaada soo oggolaaday, gurina bannaanaan yahay, Iskaashatadu waxay kuugu yeereysaa:

- inaad guriga soo eegtid
- inaad diibaaji guriga laguugu hayo bixisid
- inaad caddeysid maalintaad soo guureysid

Maxaa la iiga baahan yahay intaanan soo guurin?

Bil ka hor intaadan soo guurin, waxaad bixineysaa ijaarka bisha ugu dambeysa.Waxaa tegeysaa Iskaashatada qiyaastii usbuuc ama toban beri ka hor intaadan soo guurin si aad u soo qaadatid furayaasha guriga. Waxaad kaloo bixineysaa haddii wax kharaj ah kugu harsan yihiin, markaasna heshiiska guriga ayaad saxiixeysaa(waa heshiiska ijaarashada ee aad Iskaashatada la galeysid)

Kharajyada waxaa ka mid ah:

- ijaarka bisha u horeysa
- ijaarka bisha u dambeysa(waa haddii aanad horey u bixin)
- diibaaji lagu dayactiro wixii jaba
- kharaj xubinnimo oo hal mar la bixinayo

Waqti intee le'eg ayaan sugayaa si aan guri u helo?

Waxaa laga yabaa inay waqti qaadato sidii aad guri uga heli lahayd Iskaashato. Iskaashatooyinku way ku kala duwan yihiin waqtiga sugida; hase yeeshee, mar haddaad degtid, waxaad ku noolaan kartaa intaad doontid siiba intaad dhawreysid sharciyada iyo xeerarka Iskaashatada.

Kabid ma heli karaa?

Qof walba ma awoodo kharajka ijaarka ee Iskaashatada. Taasaana keentay in badi Iskaashatooyinku ay gar-gaar lacageed ka helaan dawladda. Iskaashato kasta qayb ka mid ah guryaheeda ayey ugu talo-gashaa in la kabo. Waxaad codsan kartaa kabid inta aadan soo guurin ama kadib markaad soo guurtid. Maadaama Iskaashatooyin badan ay hayaan taxane dheer ee kabid sugaya, waxaa laga yabaa in aadan codsiga kabidda si deg-deg ah u helin.

Qoys kasta ee weydiista kabid waa inuu caddeeyaa dakhligiisa. Taasi waxay Iskaashatada u suurto-gelineysa xisaabinta ijaarka qoyskaasi bixin karo. Xubnaha loo oggolaado kabid waxay 30% dakhligooda guud ku bixiyaan ijaar. Dakhliga guud waa dakhliga aan la canshuurin, waxaa loogu yeedhaa "dakhliga dhan."Dawladdu kabidda qoysaskaas waxay toos u siisaa Iskaashatada.

Sidee baan kabid u weydiisan karaa?

Buuxi qaabka ama warqadda lagu codsanayo kabid. Iskaashatada weydii haddii aad xaq u leedahay iyo haddii uu jiro taxane sugayaal. Haddii aad xaq u leedahay kabid, Iskaashatadu waxay ku weydiineysa warar dheeraad ah ee la xiriira dakhligaaa. Dhammaan wararka aad bixisaa waa **sir.** Iskaashatadu waxay markaas go'aamineysaa guri saaridda(ijaarka) aad bixin doontid.Waxaa lagaa doonayaa inaad Iskaashatada la socodsiisid markasta ee dakhligaagu kordho ama yaraado. Markastoo dakhligaagu is-bedelo, kabiddaaduna kor ayey u kaceysaa ama hoos ayey u dhaceysaa. Sannadkiiba mar waa inaad keentid caddeyn la xiriirta dakhligaaga xataa haddii uusan is-bedelin dakhligaagu.

Iskaa wax u qabso(tabarucid)

Iskaashatooyinku waxay aad ugu tiirsan yihiin iskaa wax u qabso. Xubnaha ku nool Iskaashatadu waxay ku tabarucaan waqtigooda ayagoo ku biiraya Guddiga Maamulka iyo Guddiyada kale. Guddiyada Iskaashatooyinku ay caanka ku yihiin waxaa ka mid ah:

Guddiga Xubin heynta
Guddiga Dayactirka
Guddiga Dhaqaalaha
Guddiga Dhul Hagaajinta
Guddiga Bulshada
Guddiga Wargeyska

Iskaashatooyin badan ayaa leh guddiyo kale.Guddiyadaas qaar ka mid ah waa joogto; qaar kalena waxaa loo sameeyaa inay fuliyaan shaqo xadidan, kabacdina waa la sii kala

daayaa.Tabarucidda macnaheedu ma ahan oo keliya in waqtiga shaqo lagu dhammeysto, laakiin waxay dadka siisaa fursad ay kaga qayb qaataan hawlaha guryahooda.

Tabaruca xubnuhu kuma koobna oo kelya ka mid noqoshada Guddiga Maamulka ama Guddiyada kale, laakinn waxay qayb qaadan karaan:

- nadiifinta iyo hagaajinta Iskaashatada
- taakuleynta xubnaha kale
- caruur hayn si xubnaha kale u tagaan shirarka
- la socodsiinta xubnaha kale shirarka jira

Iskaashatooyinka badidoodu waxay xubnahooda weydiistaan inay ku tabarucaan ugu yaraan 4 saac bishiiba.

Mabaadii'da hagta Iskaashatooyinka

Xubinnimo furan

Ayadoon kala sooc lahayn, Iskaashatooyinku waxay u furan yhiin cidkasta ee u baahan khidmadooda marba haddii uu oggolyahay mas'uuliyadda la socota xubinnimada.

Maamul dimoqraadiyad ku dhisan

Iskaashatooyinka waxaa maamula xubnahooda, kuwaasoo si wadajir ah u dejiya habka maamul, go'aanada gaara, isla markaasna doorta madaxda ayaga mas'uulka u noqoneysa. Iskaashatooyinka waaweyn xubin kasta waxay leedahay hal cod.

Ka qayb-gal dhaqaale

Xubnaha dhammaantood waxay si habsami uga qayb-qaatan hawlaha Iskaashatooyinka maadaama ay ayaga ka dhexeyso. Iskaashatooyinku wax yar bay ka soo celiyaan(hadday jirtaba) lacagaha dadku gashadaan si ay xubin uga noqdaan. Wixii dheeraad ah waxaa loo hayaa mustaqbalka ama in lagu wanaajiyo khidmadaha Iskaashatada.

Madax bannaani

Dhammaan heshiisyada Iskaashatooyinku ay la galaan hay'adaha kale ama kuwa dawladda waa inay xaqiijiyaan in maamulka Iskaashatadu uu gacanta ugu jiro xubnaheeda.

Tababarka Iskaashatada

Iskaashatooyinku waxay tababar u fidiyaan xubnahooda, guddiga maamulka iyo shaqaalahaba, waxayna dadweynaha u sheegaan waxay yihiin iyo hawlaha ay qabtaan.

Iskaashi ka dhexeeya Iskaashatooyinka

Iskaashatooyinku waxay si wadajir ah uga shaqeeyaan heerar kala duwan, sida heer degaan, mid qaran ama heer caalami si ay xubnahooda ugu adeegaan.

Beel ama Bulsho

Iskaashatooyinku waxay baahida xubnahooda daboolaan ayadoo markasta ay ujeeddadoodu tahay inay dhisaan beelo waara gudaha iyo dibadda Iskaashato kasta.